



DUKUMEENTIGA ISKOOKKA BESSEMERSKOLAN

2018-08-01

Maamulaha Iskoolka; Eva Aronsson

## Maxaa dhacaya hadii ardaygu jabiyo sharciga iskoolka?

### Qodobbo dheeraad ah oo ku saabsan ficil edbin ayaa waxaa laga heli karaa sharciga u degsan iskoolka gaar ahaan cutubka 5;aad ee sharciga ilaaliya

In la qaato go`aan ku saabsand dhanka ficil edbinta ardayda ayaa waxaa loola jeedaa in awooda xukuumada ay arinta gacan ku yeelanayso. Sidaas darteed ayaa shuruudo gaar ah lagu soo roгаа qabashada iyo go`aanka kiisaska noocaasi ah. Hoos ayaa waxaa ku taal talaabo-tus oo laguugu tusinaayo sharciga iyo wixii la halmaana.

#### Talaabada koowaad

- *In ardaygu la baraarujiyo hadii dembi yar uu ku dhaco iyo in laga waaniyo dabeecad xumida.*

#### Talaabada labaad

- *Baadhitaanka macallinka iyo eryidda ardayga laga eryo fasalka haddii ardayga la waaniyay uusan waanada qaadan. Arintaani waxaa laga rabaa maclimiinta inay isku dayaan ogaanshaha sababta keentay in ardaygu si edeb daran u dhaqmo. Macallinka waxaa uu xaq u leeyahay in uu ardayga fasalka ka eryo ilaa iyo intii fasalkaasi uu ka dhamaanayo.*

#### Talaabada saddexaad

- *Waa ardayga oo iskoolka la fariisiyo.*

Macallinka ama masuulka iskoolka ayaa go`aan ka gaari karo haddii ardaygu iskoolka sii joogaayo khalad daraadeed uu galay, saacad kadib markii ardayda kale la fasaxo ama saacad kahor waqtiga iskoolka la bilaabay.

#### Talaabada afaraad

- *Baariitaanka maamulaha iskoolka dembi soo noqnoqday darteed*

Haddii ardaygu uu mutay dembi, kadibna la waaniyay oo uusan waanada qaadanin, ama dhaqan aan habooneyn la imaaday taasina waxyaabo halis ah ay dhalin karto waxaa laga rabaa ku xigeenka maamulaha, ama maamulaha iskoolka in ay wax ka ogaadaan sababta ka dambeysay dhaqan xumada ardayga. Dhakhtarka iskoolka ama daryeelka ardayga qofka ka masuulka ah ayaa waxaa laga rabaa in ay ka qayb galaan baariitaanka ardayga dhaqanxumadiisa.

- *Maamulaha iskoolka wuxuu bixin karaa digniin qoraal ah*

Natiijada ka soo baxday baariitaanka ayaa waxaa laga rabaa maamulaha iskoolka in uu ku dadaalo sidii uu ardayga dabeecadiisa u beddeli lahaa. Maamulaha iskoolka wuxuu ardayga siinayaa digniin qoraal ah.

- *Macluumaad ku socota waalidiinta*

Haddii ardaygu digniin qoraal ah la siiyay si deg ah waxaa lala xariirayaa waalidiinta ardayga, taasina waa hadii uusan ardaygu buuxinin 18 sano ama uusan guursanin.

#### Talaabada shanaad

- *Xiritaanka*

Maamuluhu wuxuu go`aamin karaa in ardaygu si toos ah ama waqti gaar ah laga reebo iskoolka imaatankiisa haddii,

1 Ardaygu isticmaalayo hab aan loo fasaxin ama si kale isku dayo in uu wax ka beddelo qiimeynta ardayga iyo hadafkiisa ee faciisa ah.

2 Ardaygu hor istaag ku yahay casharka macallinka.

3 Ardaygu u geeysta arday kale dhibaato ama hanjabad aan banaanayn.

4 Ardaygu dhaqankiisa saameyn xun ku yeesho ardayda kale.

Maamuluhu wuxuu go`aaminayaa haddii ardaygu si deg deg ah laga xiri lahaa iskoolka ama in kale.

